

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #9

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

**OAR 333-150-0000,
CUTUBKA 6-501.115**

(E) Eeyaha rabaayadda ah waxaa loo ogolaan karaa goobaha la fariisto ee banaanka ah ee goobta cuntada ayada oo la raacayo shuruudaha soo socda:
(1) Goobta cuntadu waxay diyaarisaa hanaanada qoraalka ah ee ay kamidka yihiin:

(a) Sawirka meesha banaanka ah ee loo qoondaynayo in ay u diyaarsanaanto isticmaaleyaasha eeyaha rabaayadda ah wata; ^{Pf}

(b) Hanaanka goobta cuntada ee xaqiijinaya in shaqaaluhu aysan taaban, rabaayadaysan ama si kale aysan u qabanin eeyaha rabaayadda ah si dhakhso ahna u nadiifinayaan wasakhda eeyaha ee sida kadiska ah ku dhacda. Hanaanku waa in uu sidoo kale qeexaa goobta waxyaabaha iyo qalabka muhiimka u ah nadiifinta waxyaabaha kadiska ah ee la xiriira wasakhda eyga; ^{Pf} iyo

(c) Hanaanka goobta cuntada ee loogu tala galay ogaysiinta shaqaalaha iyo isticmaaleyaasha shuruudaha faqradaan. ^{Pf}

(2) Eeyaha rabaayadda ah waa in aysan taaban saxamada wax lagu cunayo, maacuunta iyo alaabta miiska saaran. Eeyaha rabaayadda ah sidoo kale looma ogola kuraasta dushooda, miisaska iyo gogosha kale. ^{Pf}

(3) Shaqaalaha iyo isticmaaleyaashu ma ahan in ay cunto siiyaan eeyaha rabaayadda ah. ^{Pf}

(4) Eeyaha rabaayadda ah waa in ay xarig ku xirnaadaan markastana uu isticmaaluhu gacanta ku hayaa. ^{Pf}

(5) Majiro wakhti loo ogolyahay eeyaha rabaayadda ah in ay ku dhex socdaan gudaha ama qaybaha aan loogu tala galin ee banaanka ah ee goobta cuntada. ^{Pf}

SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Welwelada caafimaadka waxaa kamid ah; eeyaha oo ku xaara saxxadda goobta, shaqaalaha oo gacmaha ku salaaxa kaddibna aan gacmaha dhaqanayn, eeyaha oo wax ku cuna saxamada isticmaaleyaasha iyo u dhaqimidda qaab xasilooni la'aan ah. Qiimaynta khataraha caafimaadka, Waaxda Caafimaadka Dadweynahu waxay tilmaantay noocyada goobaha wax lagu cuno ee banaanka ah kuwaas oo aan dad weynaha ku keenayn wax khatar ah, ay yartahay ama qaliil tahay khataraha ay ku keenaysaa. Marka la joogo goobahaan, mulkiileyaasha maqaaxiyaha u ogolaanaya eeyaha goobaha banaanka ah ee wax lagu cuno waxaa laga rabaa in ay raacaan habraacyada si ay u yareeyaan khataraha dhici karta.

Eeyaha Rabaayadda ah ee jooga Goobaha Banaanka ah ee Fadhiga Loogu tala galay

Sharci cusub ayaa u ogolaanaya ku shaqeeyaha adeegga cuntada in uu siiyo goob fadhi ah oo banaanka ah kormeereyaasha jecel in ay eeyahooda rabaayadda ah wax la cunaan. Goobaha jecel in ay eeyaha rabaayadda ah ogolaadaan waa in ay keenaan hanaan qoran kaasoo muujinaya qaabka welwelka caafimaadka bulshada wax looga qabanayo kahor inta aysan eeyaha kormeereyaasha u ogolaan goobtooda.

Macluumaadka soo socda waa in la keena:

1. Sawirka iyo faahfaahinta meesha banaanka ah ee loo qoondaynayo in ay u diyaarsanaanto kormeereyaasha eeyaha rabaayadda ah wata.
2. Ku lifaaqaan nuqul kamid ah siyaasadda goobta ee loogu tala galay dhammaan shaqaalaha kaasoo sheegaya “Shaqaalaha waxaa laga mamnuuci doonaa taabashada, salaaxidda, ama si kale u qabashada eeyaha ayada oo cunto la siinayo ama cabitaan, qabashada alaabta miiska saaran”, iyo “Waxyaabaha kadiska ah ee la xiriira wasakhda eeyga si dhakhso ah ayaa loo nadiifin doonaa”. Siyaasaddu waa in ay sidoo kale qeexdaa goobta loogu tala galay weelka wasakhda eeyga.
3. U qeexdo qaabka ogaysiiska shaqaalaha iyo kormeereyaasha goobta cuntada adeegga sababaha soo socda awgood:

- Eeyaha rabaayadda ah waa in aysan taaban saxamada wax lagu cunayo, maacuunta iyo alaabta miisaska saaran. Kormeereyaashu waa in ay eeyahooda xarig ku xiraan ayna xakameeyaan mar kasta.
- Eeyaha looma ogola kuraasta korkooda, miisaska, ama gogolaha kale.



Eeyaha habdhaqanka wanaagsan waa la ogolyahay

- Majiro wakhti loo ogolyahay eeyaha rabaayadda ah in ay ku dhex socdaan gudaha ama qaybaha aan loogu tala galin ee banaanka ah ee goobta adeegga cuntada. Eeyaha la adeegsado **ayaa** loo ogolyahay gudaha goobaha isticmaalaha.
- Eeyaha khatarta ah iyo kuwa khatarta keeni kara waa mamnuuc. Goobta cuntadu waxay eeyaha u diidi kartaa dhismahooda.